

Caawinaada kharashka oo Kooban

Isbitaalka Carruurta iyo Bukaansocodyada ee Minnesota wuxuu kugu caawin doonaa baahidaada dhaqaale ee adeegyada. Waxaa naga go'an inaan daaweyno ilma kasta, iyadoo aanan u eegin in ay lacagta iska bixin karaan iyo in kale. Sharcigeenna kaalmada dhaqaale wuxuu bukaanka xaqa u yeesha u hayaa kaalmo ah qeybta deg-dega (emergency) ama daryeelka kale ee caafimaadka iyo adeegyada muhiimka ah.

Dhammaan wixii xaalad deg-deg ah iyo daryeelka caafimaadka iyo adeegyada muhiimka ah ee Isbitaalku bixiyo waxaad xaq u yeelan kartaa kaalmo dhaqaale.

Yaa xaq u yeelan kara kaalmada dhaqaale?

- Bukaanka buuxiya "Codsiga Foomka Isbitaalka ee Kaalmada Dhaqaale" (Hoos ka eego)
- Bukaanka xaq u yeesha ka dib marka uu xafiiska La-talinta Dhaqaalaha eego codsigaaga.

Maxay yihiin kaalmada dhaqaale ee I a heli karo?

Haddii aad caymis haysato, waxaad xaq u yeelan kartaa qiimadhimis dheeraad ah oo ah 30% in laga dhimo qaansheegadka bukaanka:

1. Haddii dakhligaagu ka yar tahay 350% heerka saboolnimada Federaalka.
2. Haddii aad keento gebi ahaanba wixii caddeyn ah oo lagaa codsado inaad ku muujiso dakhligaaga

Haddii aadan haysan ceymis caafimaad ama wax kaa bixiya adeeg muhiim u ah caafimaadka, waxaad xaq u yeelan kartaa qiimadhimis:

1. Codso kaarka Caafimaadka dowladda (MA) haddii dakhligaagu ka badneyn heerarka saboolnimada cor ku qoran.
2. Dakhligaagu ka yar yahay \$125,000 sanadkii.
3. Keen dhamaan warqadaha dhalabkaaga si loo xaqiijiyo dhakhligaaga
4. Bukaannada xaq u yeesha qiimadhimis waxaa lagu dallacayaa lacag aan ka badneyn tan caadiga ah; wakhtiga xaadirka ah qiimadhimistu waa 51% lacagta isbitaalka iyo bukaansocodyada isbitaalka, 42% bukaansocodyada Bushada.

Sida loo codsado kaalmada dhaqaale ee Isbitaalka Caruurta:

La-taliyeyaal dhaqaale ayaa diyaar u ah in ay kaa caawiyaan arrimaha la xiriira kharashka caafimaadka iyo in ay kaala shaqeeyaan habka kaalmada dhaqaale. Waad nasoo wici kartaa, xafiiska noogu imow, ama foomka codsiga kala soo bax shabakadeenna oo boostada noogu soo dir. Waxaan kaloo haynaa foomka oo ku qoran afafka kala ah Ingiriiska, Isbaanishka, Hmong, Soomaali, Ruush, iyo Fiyeetnaamiis.

Fadlan noo oggoloow 2-3 asbuuc oo aan kuugu soo jawaabno. Waraaq ayaa lagu soo diri doonaa marka go'aan la gaaro ama haddii loo baahdo macluumaad dheeraad ah.

Isbitaalka Carruurta – Minneapolis

Taleefanka: 612-813-6432

Fakis: 612-813-6429

Cinwaanka Waraaqaha: Kala talinta kharashka #17-750, Children's - Minnesota, 2525 Chicago Ave S, Minneapolis, MN 55404

Xafiiska: Family Resource Center, Dabaqa 2^{aad}, ka soo horjeedka miiska soo-dhaweynta (Welcome Center desk)